# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:24 AM    HANSARD No.27/02    Kal-fadhiga 27aad**

**Fadhigii 8aad**    ***24/March/2015***

## Wasiirka Wasaarada Duulista iyo Hawada oo Mudanayaashu Goluhu wax ka weydiiyeen Xeerka Duulista madaniga ah

**Gudoomiye Md. C/raxman M. C/ilaah (Cirro):-** waxaa maanta Golaha fadhiga maanta jooga Wasiirka Wasaarada Duulista Hawada, sidii fadhigii shaley Mudanayaashu dalbadeen in Wasiirka loo yeedho si Xeerka Duulista Madaniga wax looga weydiiyo, markaa waxaan ku soo dhoweynayaa Wasiirka Dulista Hawada Md. Maxamuud Xaashi Cabdi, ku soo dhowow Mudane Wasiir.

Md. Maxamuud Xaashi Cabdi
Wasiirka Wasaarada Duulista Hawada

***Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Sharafta leh,***

Sharaf weyn bay noo tahey inaan hornimaadno Golaha Wakiilada aniga iyo Agaasimaha Guud ee Wasaarada Duulista iyo Hawada si aan sharax kooban uga bixino xeerkan Golaha horyaala, Xeerkan la idiin qeybiyay wuxuu nuxurkiisu iyo ujeedadiisu yahey in lagu asaaso hay'ad madax banaan oo Qarankani leeyahey oo isku duba rida ama agaasinta hawlaha duulimaadyadiina madaniga ah, Somaliland qarankan aan soo yagleelnay mudo yar ka hor oo maanta baarka ka jarey dhowr iyo labaatan sano ilaa iyo hada malaha hay'ad shaqadaa inoo qabata, sidoo kale malaha xeer hay'addaa lagu maamulo, hay'addaha noocan oo kale ahna degreeto laguma maamulo ee Xeer baa lagu assaasaa oo lag sameeyaa, xeerkaas oo nidaamsan oo waafaqsan shuruucda caalamka aan la shaqeyneyno.

Wuxuu kaloo u baahan yahay Xeerkaasi in sharci-dajinta oo ah idinka inaad ansixisaan, Somaliland ilaa maanta malaha Xeerka noocaas ah iyo Hay'addaas, waxaanu rumeysanahey in baahi weyn loo qabo in la abuuro, waxaan kaloo aaminsanahey in Xeerkaa loo baahi weyn loo qabo, jiritaankeena qaranimo ayaa ku jirta, waxaa ku jirta wada-shaqeynta caalamka aynu la leenahey, qarankii aan ka go'nay ee Somaliya waxaa loo sameeyay September 1965kii Xeer Lr. 13 la odhan jirey oo maamuli jirey Civil Aviationkii dawladii Somaliya la odhan jirey, wax ka dambeeyay oo aynu sameynayna ma jirin.

Meel marinta Xeerkan aad habeysaan oo aad isku duba ridaan ama aad ka gudataan waajibkiisa dastuuriga ah waxay dhibada u adkeyneysaa Qaranimada Somaliland iyo Meel marka sumcadiisa, dunidu waxay leedahey hay'addo u qaabilsan shaqooyinka halka iminka Wasaaradu ka maamusho inaga, Shaqada iminka anagu waxaanu u maamulnaa Wasaarada ahaan, dunida Wasaaarado ma maamulaan shaqada duulimaadyada madaniga ah, ujeedada looga madax banaaneeyay waxa weeye inay jirto hay'ad ka madax banana fuilnta ooka madax banaan (autonomous) ah, waa inay noqotaa mid si madax banaan u maareyn karta shilalka iyo dhibaatooyinka ka dhaca hawadeena iyo muranada soo baxa.
baahidaa anagoo ka duuleyna waxaanu kaashaney oo caaawimo weydiisaney dawlada ingriiska sababtoo ah aqoon xirfadeed uma lihin rageenii hore ee bartey civil aviationka wey gaboobeen ama wey dhamaadeen.

Waxaynu u baahaney in dad cusub oo aynu aqoontii barno, waxa kale oo aynu u baahanahey Xeerar kani ku jiro la inaga caawiyo, dawlada ingriiska anigoo hortiina uga mahadnaqaya gaar ahaan FCO wasaarada Duulista iyo Hawada oo lacag ku bixisey inay Xeerkan Khabiir u soo kireyso, waxay u soo kireeyeen laba khabiir, labadaa nin waxay ahaayeen rag ku takhasusey Shuruucda Hay'adaha Duulista ee Dunida loo sameeyo, waxayna ka soo shaqeeyeen meelo badan iyagaana xeerkan isku soo duba ridey.

Xeerkan wuxuu ka kooban yahay laba qeybood, qeyb waa hay'adda duulimaadyada dunida aynu kala shaqeyno Standard baa la inaga doonayaa, waana rukumada uu ku taagan yahay dal walba oo aynu kala shaqeyno duulimaadyada ama diyaaradaha dalkeena ka ganacsanaya dhamaantood waxay na weydiiyaan ma leedihiin Xeer Civil Aviation ah, hadeynu sameyno Xeerkaa waxaan ka baxsan doonaa su'aasha waji-gabaxeeda, waxaynuna jawaab sugan u heleynaa, xeerkaa ayaa laga dheeganayaa sideynu u shaqeyno, markaa qeybtaasi waa asaasi rukumada uu ku taagan yahay oo ah qeybta aynu dunida kala shaqeyno, waana iney u keedaana oo waafaqaan Xeerarka dunida iyo conventionada Duulista Hawada.

Markaa waa in Xeerkeenu waafaqaa rukumadaa ay ku taagan yihiin kuwa caalamku, oo uu ekaadaa, waxyaabaha qaar wey ku kala duwanaan karaan sida hab-dhaqanka iyo curfiga dawladnimo, kuwaasna dunidu way ogoshahey sidaad u qaabeyneyso oo u toosisaneyso adigu, laakiin waa inuu waafaqaa standardka dunida iyo dawlaha aynu ka wada-shaqeyno Duulista Hawada, hadii aynu rukumadaa ka tagno wuxuu noqonayaa xeer jaban, markaa si aan arrintaa uga taxadirno ayaan caawimo u weydiisaney dawlada ingriiska inay xeerka inala diyaariso.

Waxaa kale oo aan qaadney laba talaabo oo kale, hay'adda Duulimaadyada Caalamiga ah ee ICAO waxaanu weydiisaney inay inoo keenaa nin la-taliye ah oo aan isaga u dirney Xeerka si uu soo eego maadaama Xeerka waxa laga doonayaa uu kaa yahey, ninkaasi isaguna wuxuu qirey inuu rukumadii leeyahey.

Sidoo kale, markii aan xeerka intaa soo dhameynay intaan Golaha Wasiirada la keenin waxaanu u gudbiney Garyqaanka Guud si madaama uu Xeerku ingriis ku qorna si uu u turjumo, nuqulka rasmiga ah ee Xeerkuna waa nuqulkaa ingriiska ah ee iminka la idiin dhiibey, maadaama aaney dunidu afsomaligaraneyn si uu u noqdo internation, markaa waxaa turjumey garyaqaanka guud wixii turjamaada ka xumaadana waxaa loo celinayaa kan ingriiska ah sida xeerka afsomaliga ahiba dhigayo, markaas ayaanu Golaha Wasiirada geynay oo ay ku soo ansixiyeen idinka la idiinku soo gudbiyay.

Markaan soo kobo, Xeerkani wuxuu kala saaraya Shaqada Wasaarada Duulistu iminka heyso, Wasaarada wuxuu ku reebayaa sameynta Siyaasda, jaangoynta, qorshe u sameynta iyo wixii la mida, Hay'addana wuxuu ka dhigayaa inay noqoto qeybta fulinta siyaasdahaas, wayna wada shaqeynayaan, Xeerku sidoo kale wuxuu qeybinayaa awoodohooda sida awoodaha Wasaarada iyo Wasiirka iyo Hay'adda awoodeeda.

Marka laga tago rukunada ugu mihiimsan dunidu qaabab kala duwan bay u sameystaan hay'adda, qaarkood waa kuwo si guud u madaxbanaan (full independent) oo waxaa xukuma board awood leh, qaarna Wasaarada Fulinta ayay line minister u yihiin oo ay hoos yimaadaan, anagu waxaanu qaadaney qeybta Wasaarada la shaqeyneysa ee line minister la ah, waxaana nidaamkaasi leh dawlada itoobiya iyo wadamo faro-badan oo carbeed, wadama ingriiska iyo mareykanuna kuwa madaxa banaan bay leeyihiin, inagu madaama aynu nahey wadan curdinahey waxaanu dooraney kaas ay wasaarada la shaqeyneyso anagoo ilaalineyna rukumada asaasiga ah.

Waxaan rajeynayaa inaad idinkuna akhriyi doontaan, ka doodi doontaan, oo toosin doontaan, waxaan Golaha Wakiilada ka codsanyaa Xeerkaa baahi weyn buu dalkeenu u qabaa oo maalin walba nala weydiinayaa xeerkii Civil aviationka ma leedihiin, waxaa iminka aynu ku guda jirna wada-hadaladii Somaliland iyo somaliya iyo murankii Hawada oo ina haysta, wuxuu inaga caawinayaa meeqaamkeena Hawada iyo inaynu nahey qaar madax banana, wuxuuna u qoysgoynayaa dad badan oo iminka muranka hawada inaga dhex jiro oo waliba iminka ay ku dhex jiraan inay xeerkii hawada sameystaan, markaa waxaan Golaha si xushmad iyo qadarin leh uga codsanayaa in xeerkaa sida ugu dhakhso badan loo dhameystiro, anagu waxaanu isleenahey qodaxda iyo shilintaba waanu ka soo idleynay, aad baad u mahadsan tihiin.

***Gudoomiyaha:-*** Wasiirku wuu Mahadsan yahay iminkana waxaan siinayaa Mudanayaasha Su'aalaha weydiinaya Wasiirka si ay dhowr su'aalood oo kooban u weydiiyaan.

# Su'alihii Mudanayaashu Wasiirka Waydiiyeen:-

**Md. Cabdi kariim Aw Cali Shabeel:-**

**S1:-** dhamaan waad salamaantihiin intaa kadib Mudane wasiir Su'aasha aan ku waydiinayaa waxay tahay sida qaalibka ah civil aviation ku sigaara ayay u shaqaysaa sida aad adba halkaa aad ka sheegtay, halkan sida ku qorana wasaaradda ayay hoostimaadaa, sida ay xildhibaano qabaana waa in lakala gooyaa ayay leeyihiin. Markaa side ayay u suuro galaysaa waxaan rabaa in aad noo iftiimiso? Matahay arin suuro gali karta?

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaacii Jirde:-**

**Sixitaan:-** Gudoomiye waad mahadsanthay wasiirkana waan salaamayaa Maxamuud Xaashi waa (clarification) kaliya doodu weydanbaysaa waxaanu xalay la kulanay dadka ka ganacsada adeega diyaaradaha waxaananu weydiinay wax (consultation) ah ama khabiir idinla sameeyay xeerkan ma jiraa? Waxaanay noo sheegeen in aanay jirin, taasina waxay nagu khasbaysaa in aan iyagii dib ugu noqono oo aan nidhaa maxaad u arkaysaan in xeerkani qabyo yahay, mise caqabad ayuu ku yahay ganacsigiina.

Markaa waxaan jeclaan lahaa in (initial process) ka aad iyaga laftooda aad waydiisaan wax oo wixii aan horumar u aragtaan aad qaadataan intii aan la qaadan karina aad ka tagtaan hadii kale anaga ama gudidda hawdhaw loo dhiibi doono xeerka ayay dhib ku noqonaysaa oo hadhaw cabashadu ku badanaysaa waayo xeerkani (technical) kumana quruxbadna in goluhu si balaadhan u faragaliyo oo anagu consultants mahaysani sida adinka oo kalewaxaana laha yaabaa in aan qabyo danbe ku celino xeerka sidaa awgeed su'aashaydu waxay tahay ma lakulanteen hadii aydaan la kulmina maxaa idinka hor sitaagay? Ama waxaan jeclaan lahaa inaad taa noo waadixisaan arintaa ama aad inta aad ula tagtaan anaga noo keentaan (recommendations) kooda si aanaan xeerka ugu dhex dhicin waanad mahad santihiin

**Md. Xaamus Cismaan Cigaal:-**

**S1:-** Sacaadatul wasiir shirgudoonka waan idinsalamayaa aad iyo aad ayaad u mahadsantahay imaantinkaaga aad na hortimid waxaa kale oo aan aad ugu mahad naqayaa coppy gan English ka ee ay dalada Egriisku inaga caawisay waxaa kale oo aan soo jedinayaa in xeerarka kale ee Golaha yimaada iyana coppy yadooda la inoo keeno?

**S2:-** la xidhiidha taa uu Md Cabdiqaadir soo jeediyay oo (security) ga ku saabsan waxaan doonaynaa in aad wax nooga sheegto dayuuradaha yimaada dalku maahan kuwo (stander) ah oo ku wii la arki jiray ah hadii ay noqoto dhanka (security)-ga tusaale ahaan hadii ay diyaaradu ka timid meel cuduro ka dilaaceen oo kale maxaa idiinka qorshaysan?

## Jawaabaha Wasiirka:-

**Jawaab 1:-** dunidu sida aan hadalkaygii horaba ku daray marka laga tago tiirarka aas-aaska u ag hay'adan ee ay tahay in wadan walba Geneva-convention uu raaco  ama nidaamka caalamiga ah marka laga tago kaas oo waajib ku ah in ay dalalka caalamku u hogaansamaan oo hab kaliya loo wada sameeyo asaaskooda iyo waajibaad koodaba.

Hasayeeshee dunidu way kala nidaam duwan tahay sidaa awgeed waxaan qaadanaynaa kii dhanqankeena waafaqsan ee aan is nidhaa waad qaadan kartaa labada nidaam ee dunida ka jira, sidaa awgeed wadamada horumaray way ka madax banaantahay institutionada kale halka wadamo African ah ay xukuumaduha maamulaan hay'adan kaas ayaynu inana qaadanay oo wadamada jaarkuna istimaalaan sobohan aanu qaadanayna waxaa ka mid ah maadaama ay dawladeenu korayso oo hadhaw wax laga badali karo in aan qaadano kaas ay wadamada jaararku ku shaqeeyaan.

**Jawaab 2:-**  wadankeena in ay yimaadaan diyaarado waaweyni waxay ku xidhan tahay sadex arimood inta aanan u gudbin qodobadaa 2012 waxaan ka qayb galnay shir ay isugu yimadeen shirkadaha ka ganacsada shidkadaha diyaaradaha oo ka dhacay Geneva maabka Somaliland waxaa kaliya ku qornaa in ay timaado Ethiopian Airline oo kaliya wax diyaarad caalamiya, waxaan rabnaa in ay Somaliland ay noqoto meel mandaqadu iska gooshto.

Markaa sadexdaa arimood waxaa ka mid ah in aan Xeerkan samaysano iyo Hay'adam gundhig ayay u tahay waxaa kale oo la inooga baahan yahay in aan Goroomadeena horumarino iyo maamul wanaagsan waxanan is leenahay dhinaca wanaagsan ayaad wax u wadaan waxaana dhawaan ka bilaabi doona diyaaradaha Dubai oo hada u xaniban silig hada gacanta lagu hayo, waxaa kale oo indho indhayn ku sameeyay diyaarada Kenya iyo Turkish Airways oo aan rajo weyn ka qabno in ay bilaabaan duulimaad yadooda dhawaan.

Dhanka caafimaadkana wasaarada caafimaadku waysamaysaa waxaana wanaagsan in aan qabyooyinkeena aan dhamaystirno waa mid loo baahan yahay

## Jawaab Agaasimha Guud:-

**Jawaab 3:-** Mudne Guoomiye iyo mudanayaalba hadii aan ka jawaabo su'aasha Md. Cabdiqadir jirde waxaan ugu horaysiin lahaa qolooyinka airlines ka ee stake holders ka ah ee inala jooga meelna kuma kala maqnin waayo wasaaradayadu adeeg rasmi ah ma siiso Dadka iyagaana adeedyada bixiya oo maalin kasta galin hore iyo ku danbaba waan is aragnaa waxaa iska jira masaaliix ay ilaashanayaan waayo wadamada jaarka sida jabuuti. Kenya iyo Ethiopia xeerar ayaa ka jira oo ma jabin karaan qawaaniinta u taala lakiin halkan waxay u arkaan in aan xeer ka jirin oo ay jabin karaan qawaaniinta sidaa awgeed xeerkani wax uu dhibaataynayaa ma jiro.

Qodobka labaad xeerkani waxaa uu soo jeedinayaa in international airlines ku yimadaan dalkeena, sidaa daraadeed siyaasad ayaa nooga taal arimahaa oo diyaaradeheena waxaa loo qorshaynayaa maalmo u qaara waayo waan la soconaa traffics jira diyaaradeheena waa laga warhaynayaa waxaana loo baahan yahay in aan dunida inteeda kale ku xidhano, waanan la tashanay sida aad ku arki doontaan xeerka lakiin waxaa jira dadkeenu way neceb yihiin is badalka oo hadii ay arkaan ganaaxyo ka soo kordhiyay ay ka baqaan iyaga oo eegaya jeebkooda lakiin waxaan u sheegaynaa inuu xeerkani faa'iido u yahay oo dhanwalba leh, hadii ay noqoto security, baadhitaanada lagu samaynayo diyaaradaha dhacay waxaana hortaagan xeerkan.

Sidoo kale waxaa jira diyaaradaha bixinaya cashuuraadku oo ay ka mid tahay Ethiopian ku waxay marwalba na waydiiyaan maleedihiin tax code lacagaha la inoogu soo shubo sidoo kale tikidhada dunida laga jaray waa in la helaa meel la inoogu soo shubo taasna waxaa suuro halinaya xeerkan waxaanan codsanaynaa in xeerkan la inoo ansixiyo waad mahadsantihiin.

**Wasiirka:-** woxogaa ayaa ku dari lahaa. Run ahaantii maa mid aad u mihiim ah in hay'adaha ka ganacsada dayuuraduhu ay qay ka noqdaan xeerkan samayntiisa waayo marka xaqiiqda laga hadlo si buuxda ugalamaanaan tashan xaqiiqdii lakiin sida uu agaasimuhu sheegay dareenkooda waanu ku cabirnay halka sida uu agaasimuhu sheegay waayo xeerka qaybaa saamayn ku leh oo saamayn ku keeni kara iyaga oo aanay jeclayn waxaa cusub ee imanaya dhinaca kalana iyaga ayuu damaanad siinaya.

Waxaa kale oo aan rabnaa in dalka ay yimaadaan diyaarado cusibi oo hadii aan diidno in la inoo yimaado meeqaamkeena ganacsi ayaa hoos u dhacaya oo waalagu faanaa inta ka gooshta wadamada jaarka suuqana waan qaybinaynaa si ay fursad u helaan diyaaradaha ka soo shaqeeyay dalka, sidoo kale diyaaradahana waxaa la kala siin doonaa duulimaadyo kaladuwan oo qaar la wada siinmaayo dhamaan si aanay u kicin kuwii hore ee ka shaqaynayay dalku iyana waa in ay diyuuradahooda casriayayn ku sameeyaan waxaa kale oo meesha

taala hadii aan ganaaxyada ka qayb galino masuuliyiinta diyaaradaha waxay ila tahay in ay diidi doonaan waxyaabo badan, lakiin anaguna waan dhawranay dareenkooda ilama ahan wixii ciqaaba ee ay dadka kala siman yihiin iin aanay haboonayn in ka soo talo bixiyaan waanad mahad santihiin.

## Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan:-

**S1:-** Sida Xeerka ku qoran hay'addu waa mid madax banaan oo qaanuuniya, inta badan hay'addeheena madaxa banaan titleka la siiyo qofka xukumayaa waa Maareeye, laakiin Xeerka waxaa ku qoran Agaasime Guud, hadii hay'adda qaanuuniga ahi wasiir aynu sameyno ee madax banaan oo ka masuul ah Hawadii dhinac walba waxaad moodaa shaqadey qabaneysa inay tahey shaqada Wasaarada aad ka socotaan hada oo waxaas hawla wixii iminka ka horeeyay qabaneysay, hadii markaa Xeerkaasi hirgalo oo hay'addaas aynu sameyno oo ay ka baxdo meesha wasaaradii adiga iyo agaasimaha guud hadii la idiin magacaabo Maareeyihii iyo agaasimihii guud maxay idinla tahey?

## Md. Maxamed Jaamac Warfaa:-

**Soo jeedin:-** aniga teyda waa soo jeedin, madaama ay heshiisyo hore oo duulimaadyadu ku duuli jireen ay jireen heshiisyadaas oo kuwada jireen Shirkadaha Duulista iyo Wasaaradu, iminka Xeer cusub oo hay'ad lagu assaasayo uu ina horyaalo aan laga talo-galin stakeholderskii, aniga waxay ila tahey in Xeerkani u baahan yahay in dadkii laga talo-galiyo si sharci midha dhalin u noqdo, waxaan soo jeedinayaa in Gudi gaar ah lo saaro (ad hoc committee) si stakeholderskiina ay u soo wareystaan, ra'yiga ay ka qabaan Xeerkana loola soo eego, heshiisyadii hore ee jirey si aan loo wada burin ileyn iyagu way soo kireystaan shirkadaha diyaaradaha oo heshiis kale ayay kula jiraane.

## Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-

**S2:-** Mudane Wasiir, sida aad sheegtey Xeerkani wuxuu ka kooban yahey laba qeybood oo waaweyn, qeybta kowaad oo ah assaaska ama rukumada uu ku taagan yahay xeerkani oo waafaqsan Heshiisyada caalamiga ah iyo qeybta labaaad oo ah hab-dhaqanka dawladnimo oo wadan waliba u madax banaan yahay sida uu u dhigayo, inagoo ka duuleyna sida aad tilmaamtey waxaa jirtey in hay'adda ICAO Mudo hore oo iminka sanado laga joogo ay inaga codsadeen in la sameeyo Hay'addan madaxa banaan si ay wada shaqeynta hay'adda ICAO iyo Hay'adda madaxa banaan ay u fududaato, isla markaana ay soo codsadeen in nidaamka Xukuumadeed ama Wasaaradeed ee hoos tagto meesha laga saaro, waxaa jirtey inay mudo inagu qaadatey arrintaasi xeerkanina uu mudo soo dhex rafanayay Wasaarada iyo Golaha Wasiirada dhexdiisa, isla markaasna taasi keentay sida

noo muuqata heshiisyadii dawlada somaliya ee aynu wada-galney gaar ahaan wasaarada duulista hawada ee ahaa maamulka hawada Somaliland iyo Somaliya in lawada maamulo ay meesha ka saartey madaama hay'adii la sameyn waayay Xeerkiina Golaha Wasiirada soo dhaafi waayay, markaa miyaan la odhan Karin qaabkan aad iminka u dhigtey Mudane Wasiir maaha tii la doonayay hay'addaha caalamiga ahi inagula shaqeeyaan sida ICAO oo kale sababtoo ah waxaad sheegtey inay dawladuhu u madax banaan yihiin inay iyagu maamulkooda ku darsadaan nidaamka ay u ekaaneyso hay'addaasi, miyaaney taasi inagu keeni Karin madax banaanidii aad sameyn weydeen madaama oo sida aad sheegeyso Wasaaradii ay hoostageyso?

**S3:-** Maxaase inagu kalifaya in hay'addan aan abuureyno ee iminka xeerkeeda hayno inay hoos tagto Wasaarada Duulista Hawada oo ay u noqon kari weyday mid boqolkiiba boqol madax banaan oo board madax banaan yeesha, waayo hay'adda marka board loo sameynayo maaha dad ajaaniba ee waa dad madaxweynuhu degreeto ku magacaabayo oo qaban kara shaqadii wasaaradu qabaneysay, miyaan lagu kalsoonaan Karinse, maxaase inoo diidaya?

## Jawaabta Wasiirka:-

**Jawaab 1:-** magaca loo bixinayo Masuulka hay'adda, hadii aanu jirin standard caalamiya wadanku wuxuu doono ayuu ka dhigtaa, haduu jiro nidaam go'an oo standard ah oo dunidu magacaa ula baxdona kaas ayaa loola baxaa, magacaasi tiirarka ayuu ka mid yahey in loo bixiyo Director General qofka maamulaya hay'addaas oo waa standard, intii kale ee xildhibaanku yidhina waxay aheyd iska kaftan, anaguna sidiina oo kale rag la soo doortey ma nihine dhoobiyo ayaanu nahey hadii barito iska taga la yidhaahdona waa tageynaa.

**Xildhibaan Warfaa** arrimaha uu ka Hadley waa arrimaha aanu laheyn dareenkooda ayaanu qabnaa masuuliyad balaadhan baa na saaran, wixii aheyd in lagala tashadona deedafeyn meyno oo xeerka ay ku jiraan, dadkaasina xuquuq bay dalka ku leeyihiin, wixii aan aheyn in laga tashadona anagu kala tashan meyno, waxaa ka mid ah wixii heshiis ah ee maanta garoomada diyaaradaha ka jira laga tashan maayo, xeerkani wuxuu laalayaa inaynu wixii somaliya la odhan jirey aynaan ka mid aheyn, qarankaa aynu ka mid ka aheyn xeerkiisa waxbeynu ku laheyn, dastuurkeenu wuxuu sheegayaa xeerarka inaynu ku dhaqano, xeerkaasi kuwa aan daliishano ayuu ka mid ahaa, xeerkanina kuwaas ayuu laalayaa iminka, maalinta aad sameysaan wuxu noqonayaa xeer Somaliland u gaar ah sida ku cad Qodobka 89[aad] ee Xeerkan, Wasiiradii soo marey heshiisyadii ay galena wuu ayidayaa wixii aan ka hor imanayn xeerkan dhamaantoodna wuu damaand qaadayaa waxayna ku cadahey Qodobka 90[aad] heshiisyada daruuriga loo

arko ee aan ka hor-imaneyn Xeerkan, Goluhuna isagaa awood u leh ciduu la tashanayo ama haduu gudi u saarayo.

**Jawaab 2:-** waxaan qabaa inaan anagu dedaalney hadii aan maanta soo sameynay horta waa alxamdulilaah oo Somaliland in badan bay soo jirtey intaa baahida waa la qabey xildhibaan oo dalku wuu qabey baahidaa civil aviationka, waxaan kale oo aan leeyahay hadaanu nahey Wasaarada sanado Xeerku Wasaarada iyo Golaha Wasiirada kuma dhex rafaneyne intaanu sameynayna waanu ku foogneyn, iminka intuu idin ka horyaaleyna waa sanad, markaa waa toosinayaa Ibraahim ee sanad bu idin horyaaleye ka jawaaba sababta uu idiin horyaaley.

**Jawaab 3:-** Qodobka ah miyaan ICAO u arkeyn inaanu xambaarsaney Nuxurkii la doonayayna hadalkeygii hore ayaan ku darey oo ICAO khubaradeeda waanu tusney waa ok bay yidhaahdeen, khubarada sameysay xeerkuna waxay ahaayeen ruug cadaa waligood ka soo shaqeynayay Civil Aviation, tan ah maxaa idinku kalifaya inay wasaarada hoos timaadona, nidaamkeena ilaa iminka kuma jirto hay'ad madax banaan oo aan line minster laheyn, wakaaladaha, dekada Berbera iyo Wakaalada Wadooyinkana oo iminka xeerkeedii la idiin keenayba dhamaan line minister bay leeyihiin, micnaheeduna maaha awoodeedii baa la qaadaye waa check and balance, duniduna laba ha boo ah in board check and balance u sameeyo iyo hay'adda Wasaarad Dawladeed u sameyso labada waa wax la isticmaalo, mar hadii aanu xeerkeenii bureyn oo uu dabaqayo standardkii caalamiga ahaa dee wixii kaleba nalaga qaadye maxaad noogu diideysaa inaanu monitoring ku sameyno ileyn waa anagaa galbineyne,

## Md. Maxamed Saalax Cige:-

**S1:-** Qodobka 84aad wuxuu ka hadlayaa caymiska wuxuu tilmaamayaa caymiska iyo diyaaradaha noocaas ah, sidaan wada ognaheyn dalkeena ma jiro hay'ado caymis ah iyo Xeer Caymiska ku saabsan, taasi maaney keeneyn maanta marka qof hawl-wadeen ah ama hay'addaas ka socda ama ka shaqeeya ilaahey inaguma keeno eh hadii khalad ka dhaco caymiska la ina saarayo maanu culeys maaliyadeed oo badan ama kharash badan oo magdhow ah inagu keenayn hadii aan la helin xeerkii caymiska?

**S2:-** Waxaa Xeerka ka muuqata inaan shirkadii maxaliga ahaa aan wax mudnaan ah la siin, markaa maxaa iyagana aad u siin weydeen oo xeerka loogu siin waayay mar hadii wixii ganacsi yahey oo dadkiina diyaaradihii ka ganacsada iyo hawlahooda, Markaa maxay tahey sababta loo siin waayay mudnaan iyo Tix-galin?

**Jawaabta Agaasimaha:-**

**Jawaab S1:-** Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal Xildhibaanku laba su'aalood buu na weydiiyay anigu su'aasha hore ee caysmiska ku saabsan baan ka jawaabayaa, caymisku waa laba caymis, mid diyaaradahaa la galiyaa oo dalkeenaba laguma hayo inaguna diyaarado ma lihin oo waynu soo kireysanayaa diyaaradaha, waa caymis malaayiin ah oo shirkadahaa u madax banaan, markaa iyagaa iska bixiya oo iminkaba way ku jiraan waxayna ka galaan dunida horumartey bay ka galaan iyo meelaha diyaaradaha iska leh, caymiska labaadna waa caymiska shaqaalaha, markaa dadkeena waxaa iska jira ceymiskii qabaliga ahaa oo koley ma xoogana, Shirkada NASHA oo madaarka ka shaqeysa oo kale iyaguna caymis local ah bay ku jiraan oo dalkeena ka jira, shaqaalahana waanu u raadin doonaa caymiska gudaha, xeerarkana way ku jirtaa oo fasiraad baa loogu sameyn doonaa qaabka loo galinayo.

**Jawaabta Wasiirka:-**

**Jawaab S2:-** wixii naga qabyo ah inaynu sameysanaa waa inagu waajib uu ka mid yahey Xeerka Caymisku, shuruucdana inaga dhiman weeye, sida xeerarka inaga dhimana waa inagu waajib waliba inay xukuumadu sameyso oo Golaha u soo gudbiso, weynuna ku darsan doonaa qorshaha, idinkuna mudanayaashu hadey qaab ku keeni karaan laftigoodu ayaa xeerarku jideynayaa, Su'aasha labaad Xildhibaan M. S. Cige ee aheyd maxaad mudnaanta loo siin waayay oo ay xeerka uga muuqan weyday muwaadiniintii hore uga shaqeynayay diyaaradaha, waxaan is leeyahay anigu waxay taasi ka hor-imaneysaa waxyaabaha aynu dooneyno, waxay u muuqaneysaa inaynu xidheyno suuqeena iyo tartankeena oo monopoly abuureyno, waxayna ka hor-iman kartaa Qawaaniinteena iyo dastuurka, waxayna u baahan tahey markaad monopoly abuureyso inaad muhiimada siiso ilaa xad xeerarka iyo qawaaniinta laguma muujiyo.

Diyarada Ethiopian Airline waa shirkad caalamiya oo leedahey dawlad aynu daris nahey oo aan ilaa xad saaxiibo nahey oo wax badan inaga dhexeeyaan, waxay ka ganacsataa hawadeena oo waxay sameysaa maalintii laba duulimaad oo caalamiya, wiigiina 14 duulimaad bay leeyihiin, dayuurad kale oo intaa sameysa ma jirto, waxaa ruudkeedu yahey Hargeysa iyo Adisababa, waana laga yaabaa inay mararka qaar dirir dhaba ku leexato laakiin waa wadankeenii, umana gudubto Jabuuti, kenyana ma qabato, waxaanuna intaa ugu koobney waxa weeye waxaanu ku ilaalineyn Shirkadaha localka ah, iyagu waxay haystaan freedom oo waxay ka soo duulaan Kenya waxay yimaadaan Muqdisho, Somaliland bay yimaadaan waxay tagaan Jabuuti ilaa dubai.

Markaa mudnaanta kaweyn oo aan siin lahaa maxay tahey? Cashuur dheeraad ahna lagagama qaado ruutskaa, royalatsna lagama qaado, kaliya waxaanu ku adkeynaa war diyaaradaha iska hagaajiya oo diyaarado cusub keena, wayna dedaaleen oo diyaarado fiican bay keeneen oo caymis ku jira, qaarkood way isku biireen, taana dantooda ayaa ku jirta si aan tartanka loo buquujin, marka mudnaanta ayay ka mid tahey, mudanaantaana Xeer kuma qori kartin oo freedom diyaaradaha somalida ah Xeerkaaga kuma muujin kartid, laakiin waxaa jirta hay'addan duulimaadyada madaniga ayaa ka turjumeysa, waxaa ka mid ah diyaarad kasta oo timaada oo tiraahda duulimaadyo madani ah bay dooneysaa 7 ah, fly dubai waxay dooneysaa 7 fly oo afarna naga siiya Hargeysa, saddexna Berbera, waxaan siinay 4 fly oo midna Berbera tag saddexna Hargeysa, sababtoo ah passengerka yare e kooban baan dooneynaa inuu qeybsamo.

Waxaanu dooneynaa inaaney diyaaraduhu biyo dhicin oo aan qaar la kicin si hal diyaarad iyo laba xoog leh isugu soo hadhin, taasina inaga dan inooma aha, maalmaha hore wuu jabayaa laakiin sanad gudihii marka laga taqaluso waxaa soo hadhaya shirkadaha qudhac iyo galool kaliya oo iyana qiimihii xoog u kiciya, sidaasna dunida oo dhan baa sameysa regulartska iyo freqeuncega in la qeybiyo, markaa waxyaabaha aanu ku muunadeyneyno bay ka mid tahey mana mudna in Xeer waxaas oo kale lagu qoro waxaa lagu soo saari karaa Xeer-nidaamiyaha, waan ka baxay, aad baad u mahadsantihiin.

***Gudoomiyaha:-*** Wasiirka iyo Agaasimuhu way mahadsan yihiin, hal iclaam baan doonayaa inaan golaha ogeysiiyo, maanta waxa imanayay Xildhibaan ka socda baarlamaanka dalka Denmark Gudidda qaabilsan Hubnka Fudud, markaa barito wuxuu iman doonaa Golaha hadii ilaahey ka dhigo, Wasiirka waan fasaxaynaa aad bayna u mahadsan yihiin isaga Agaasimuhu, Laba nuqul baa Mudanayaasha loo qeybiyay oo la siiyay, nuqul afsomali ah iyo nuqul Af-ingiirsi ah oo maanta la siiyay, waxaan jecelahay inaad si fiican u soo akhridaan si aynu xeerkan uga baaraan degno waajibaadkeenana uga gudano, Fadhigiina sidaas ayuu ku xidhan yahay ilaa barito hadii ilaahey ka dhigo.

***Speaker:-*** *(The House rose at 11.38 AM and adjourned until thusday, 24 jMarch 2015 at 9.00 AM.)*

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------- | ----------------------------------------- |